

Magozwe

- ✎ Lesley Koyi
- 👤 Wiehan de Jager
- 💬 Abdi Muse
- 💬 somaliska
- 📊 nivå 5





Gudaha magaaladda mashquulsan ee Nayroobi, ee ka fog daryeel nolol ee guriga, waxaa ku noolaa koox wiilal ah oo hoy la'aan ah. Waxay soo dhaweeyeen maalin kasta sidii ay u timid. Subax subxaha kamid ah, wiilasha ayaa darimahooda laablaabanayay ka dib ku seexashadi wadada qaboow qarkeeda. Si aay isaga kiciyaan qabowga waxay shiteen dab qashin lagu shiday. Kooxdan wiilasha ah waxaa ka mid ahaa Magozwe. Wuxuu ahaa kan ugu yar.



Markii waalidkii Magozwe dhinteen, wuxuu ahaa shan sano jir. Wuxuu aaday adeerkii si uu ula noolaado. Ninkani ma daryeeleyn ilmaha. Ma uusan siin Magozwe cunto ku filan. Wuxuu ka yeelay wiilka in uu qabto shaqo badan oo adag.




Haddii Magozwe uu ka cawdo ama su'aalo, adeerkiis ayaa garaaci. Markii uu Magozwe weydiistay inuu iskuul aadi karo, adeerkiis ayaa garaacay oo ku yidhi, "Aad ayaad nacas u tahay in aad wax barato." Saddex sano oo loola dhaqmayay Magozwe waa uu ka cararay adeerkii. Wuxuu bilaabay in uu ku noolaado waddada.



Nolasha waddadu way adkayd, badankoodna wiilasha waxa ay maalin walba la halgamayay si ay cunto u helaan. Mararka qaarkood waa laxiraayay, mararka qaarkood waa la garaacaayay. Markii ay xanuunsadaan, ma jirin cid caawisa. Kooxdu waxay ku tiirsanayd lacagta yar ee ay tuugsiga ku soo helaan, iyo iibinta caagadaha iyo dib-u-warshadaynta kale. Noloshu waxa ahayd mid sii adag sababtoo ah dagaalo lala galo kooxo cadow ah oo rabo in ay maamulaan qeybo kamid ah magaalada.



Maalin maalmaha ka mid ah markii uu Magozwe fiirinayay weelka qashinka lagurido, wuxuu helay buug sheeko oo gaboobay oo dildilaaacsan. Waxuu ka nadiifiyey wasakhdii waxuuna ku ritay jawankiisa. Maalin walbo malintaa kadib wuxuu soo bixin jiray buugga oo eegi jiray sawirada. Ma uusan aqoonin sida loo akhriyo ereyada.



Sawirada waxay sheegi jireen sheeko wiil weynaaday sii u noqdo duuliye. Magozwe wuu maalin riyoon jiray isagoo ah duuliye. Mararka qaar, waxuu niyeysan jiray in uu yahay wiilka sheekada ku jiro.



Waxay ahayd qabow, Magozwe waxa uu markale taagnaa wadada asagoo tuugsanayo. Nin baa xagiisa u soo dhaqaaqay. “Helo, waxaan ahay Thomas, waxaan ka shaqeyaa meel halkan u dhow, oo aad ka heli karto wax aad cunto,” ayuu yiri ninkii. Waxa uu tilmaamay guri jaale ah oo leh saqaf buluug ah leh. “Waxaan rajeynayaa in aad halkaas aadi doonto si aad u hesho cunto?” ayuu weydiiyay. Magozwe wuxuu eegay ninkii, ka dibna guriga. “Waa laga yaabaa,” ayuu yiri, wuuna ka dhaqaaqay.



Bilihii ka dambeeyey, wiilashii hooy la'aanta ahaa waxay la qabsadeen araga Thomas meelaha ka dhow. Wuxuu jeclaa in uu la hadlo dadka, gaar ahaan dadka ku nool wadooyinka. Thomas wuxuu dhageystay sheekooyinka nolosha dadka. Waxa uu ahaa mid aad u daneeyo una dulqaato, marnaba ma ahayn mid kibro ama ixtiraam daran. Qaar ka mid ah wiilasha waxay bilaabeen in ay aadaan guriga jaalaha iyo buluuga ah si ay cunto u helaan duhurnimadii.



Magozwe wuxuu fadhiyay wadada qarkeeda isaga oo eegaya sawirka buugiisa markuu Thomas soo fadhiistay agtiisa. “Maxay sheekada ku saabsantahay?” ayuu Thomas weydiiyay. “Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo noqday duuliye,” ayuu Magozwe ku jawaabay. “Waa maxay magaca wiilka?” ayuu Thomas weydiiyay. “Ma aqaan, ma aqrin karo,” ayuu Magozwe si hoos ah u yidhi.



Markii ay kulmeen, Magozwe wuxuu bilaabay in uu sheekadiisa u sheego Thomas. Waxay ahayd sheekadii adeerkiis iyo sababta uu ooga soo tagay. Thomas lama hadlin wax badan, mana u sheegin Magozwe waxa uu sameyn lahaa, laakiin marwalba wuxuu u dhageystaa si taxadar leh. Mararka qaark way hadli jireen markii ay ku cunaayan guriga leh saqafka buluugga ah.



Maalintii tobnaad dhalashada Magozwe wuxuu Thomas siiyey buug sheeko oo cusub. Waxay ahayd sheeko ku saabsan wiil yar oo tuulo joogay oo koray si uu u noqdo ciyaaryahan caan ah. Thomas wuxuu sheekadaas u akhriyey Magozwe marar badan, ilaa hal maalin ayuu yiri, “Waxaan u maleynayaa inay tahay waqtigii aad tagtay dugsiga aadna baratay si aad u akhrido. Maxaad u malaynaysaa?” Thomas wuxuu sharxay inuu ogaa meel ay carruurta joogi karaan, oo aadaan dugsi.




Magozwe wuxuu ka fakaray meeshan cusub, iyo aadista iskuulka. Maxaa dhacaya haddii uu adeerkiis saxsana oo uu ahaa asaga mid aad u nacas ah inuu wax barto? Maxaa dhacaya haddii ay ku garaacaan meeshan cusub? Wuu cabsaday. “Waxaa laga yaabaa in ay ka wanaagsan tahay inaad ku sii noolaato wadada,” ayuu ku fakaray.



Wuxuu lawadaagay cabsidas Thomas. Muddo ka dib ninkii ayaa ku booriyay wiilka in noloshu ku fiicnaan karto meeshas cusub.



Oo sidaas daraaddeed Magozwe wuxuu dagay qol guri saqaf cagaaran. Wuxuu qolka la wadaagay laba wiil oo kale. Guud ahaan waxaa jiray toban carruur ah oo ku noolaa gurigaas. Eedo Cissy iyo ninkeeda, seddex eey, bisad, iyo ri duq ah.



Magozwe wuxuu bilaabay dugsiga, waxayne ahayd mid adag. Waxaa u yaalay wax badan in uu la qabsado. Mararka qaar wuxuu doonayay in uu iska daayo. Laakiin wuxuu ka fekeray duuliyihii iyo ciyaaryahankii kubadda cagta ee buugta sheekooyinka. Sida iyaga oo kale, ma uusan is dhiibin.



Magozwe wuxuu fadhiyay deyrka gurigii saqafka cagaara, akhrisanayo sheeko buug oo dugsigaa. Thomas baa u yimid oo soo ag fadhiistay isaga. “Maxay sheekada ku saabsantahay?” waxaa weyddiiyay Thomas. “Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo macallin noqday,” ayuu yiri Magozwe. “Waa maxay magaca wiilka?” waxaa weyddiiyay Thomas. “Magaciisu waa Magozwe,” ayuu yiri Magozwe isaga oo dhoola cadeynaya.



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Magozwe

Skriven av: Lesley Koyi

Illustrerad av: Wiehan de Jager

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons
[Erkännande 4.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).